

Ku Heshiiska in La Bixiyo Adeegyada Daryeel-Caafimaadka

Agreement to Pay for Healthcare Services

WAC 182-502-0160 (“Biil Ku-Dallaca Macmiilka”)

Tani waa heshiis ka dhexeeya “macmiil” iyo “bixiye,” sida lagu qeexay hoosta. Macmiilka ayaa oggol inuu siiyo bixiyaha adeegga(yada) daryeelka-caafimaad ee ayna bixin Maamulka Dareyeelka Caafimaad (HCA). Labada dhinacba waa inay saxeexaan Heshiiskan. Ujeedooyinka Heshiiskan marka la eego, “adeegyada” waxa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn daaweynta, qalabka, waxyabaaha caafimaadka loo isticmaalo iyo daawooyinka daryeelka-caafimaad.

Macmiil – Waa qaataha Medicaid ama manfaca kale ee daryeel-caafimaad ee loo maro HCA ama urur daryeel maareysan (MCO) oo qandraas la qaadatay HCA.

Bixiye – Waa hay’ad, wakaalad, meherad, ama qof u bixiya adeegyada daryeel-caafimaad macaamiisha HCA oo heshiis saxeexan la leh HCA ama idmasho ka leh MCO.

Heshiiskan iyo xeerka WAC 182--502-0160 ayaa khuseeya lacag ku dallacaadda macmiilka qaatay adeegyo hoos yimaad caymis ama aan hoos iman sida lagu qeexay WAC 182-501-0050 illaa WAC 182-501-0070. Bixiyeyaashu ma aha inay lacag ku dallacaan macmiil kasta oo HCA (oo ay ku jiraan kuwa ku qoran MCO ee qandraas la leh HCA) adeegyada HCA ama MCO qandraas la qaadata HCA ay laga yaabo bixiyeen illaa u bixiyuhu dhammaystiro shuruudaha helitaanka oggolaanshaha.

Magca Macmiilka oo Daabacan	Lambarka Aqoonsiga Macmiilka
Magaca Bixiyaha oo Daabacan	Lambarka Bixiyaha

Tilmaamaha:

- Bixiyaha iyo macmiilku labaduba waa inay si dhammaystiran u buuxiyaan foomkan **kahor** adeeg kasta oo Heshiiskan loogu baahan yahay in lagu siiyo macmiil HCA.
- Waa in la buuxiyaa foomkan waxaan ka badnayn 90 maalmo taariikh kahor taariikhda adeegga. Haddii aan adeegga la bixin gudahooda 90 maalmo taariikh, bixiyaha iyo macmiilkuba waa inay foom cusub buuxiyaan oo ay saxeexaan labaduba.
- Bixiyaha iyo macmiilku waa inay buuxiyaan kaliya foomkan **kadib** markay ka quustaan dhammaan nidaamyada khuseeya HCA ama MCO qandaraas ay ku siisayHCA oo loogu baahan yahay in lagu helo oggolaanshaha adeegga(yada) la codsaday. Kuwan waxa ka mid noqon kara qaab-socodka ka duwanaashaha (ETR) ee ku wajahan adeegyada aan caymiska hoos iman sida lagu sifeeyay xeerka WAC 182-501-0160 ama Nidaamka Dhageysi Maamuleed, haddii u macmiilku doorto inuu ku dhaqaaqo nidaamyadan.
- Macaamiisha Garashada Af-ingiriisiga ku Xaddidan tahay (LEP) waa inay ku fahmi karaan foomkan luqaddiisa/deeda hore. Kan waxa ka mid noqon kara foom la tarjumay (translated) ama af-celinta (interpretation) foomka. Haddii foomka loo af-celiyo macmiilka ah, qofka af-celiyaha ahi waa inuu saxeexaa oo waliba taariikhda ku qoraa foomka. Labadooduba macmiilka iyo bixiyuhuba waa inay saxeexaan foomka tarjuman .

Si dhammays-tiran u buuxi jadwalka dhabarka foomkan ku yaal. Haddii loo baahdo, ku lifaaq xaashi kale oo loogu talagalay adeegyada dheeraadka ah. Macmiilka, bixiyaha, iyo af-celiyaha (haddii ay khuseyso) waa inay saxeexaan oo taariikhda ku qoraan bog kasta oo dheeraad ah.

Ogeysiiska Muhiimka ah oo ka Socota HCA:

- Heshiiskani waa waxba-kama-soo-qaad oo lama fulin karo haddii u bixiyuhu u ka gaabiyo inuu u-hoggaansamo shuruudaha foomakan iyo xeerka WAC 182-502-0160 ama xaaladaha bixinta ee HCA uuna qancin sida lagu sifeeyey Xeerka Maamuleed ee Washington (WAC) iyo Tilmaamaha Ku Dallaca arrinta khuseeya. Bixiyuhu waa inuu dib-ugu celiyaa macmiilka qaddarta lacagta oo buuxda ee macmiilku bixiyay.
- Fiiri xeerka WAC 182-502-0160(9) si aad u ogaato adeegyada aan lagu dallici karin macmiilka, iyada oo aan loo eegin heeshiiska qoran.
- Ku hay heshiiskii hore diiwaanka caafimaad ee macmiilka illaa 6 sano laga bilaabo taariikhda heshiiskan la saxeexay. Nuqul heshiiskan ah lana buuxiyey oo la saxeexay waliba waa in la siiyaa macmiilka.
- Bixiyeyaasha ayaa ka mas’uul ah hubinta tarjumaadda ama af-celinta foomkan oo waxa ku jira waxa la siin doonaa macaamiisha LEP. Foomamka la tarjumay waxa laga heli karaa [HCA forms and publications \(https://www.hca.wa.gov/billers-providers/forms-and-publications\)](https://www.hca.wa.gov/billers-providers/forms-and-publications).

Adeegga(yada) gaarka ah ama shey(ada) ee la bixin doono oo la sugayo taariikhda adeegga	Koodhka CPT/CDT/HCPC (koodhka ku-dalacaadda)	Qaddar lacag ee macmiilka bixin doono	Sababta Macmiilku uu u oggolaanayo in lagu soo dallaco (sax ku same midka khuseeya adeeg) kasta	Daaweynta duwan ee caymiska loo fidiyey laakin uuna dooran macmiilka	Taariikhda(taariikhaha) ETR/NFJ la codsadey/la diiday ama laga dhaagey, ama oggolaansha ha hore (pa) la codsadey/diiday, haddii ay haboon tahay	
			<input type="checkbox"/> Adeegga bilaa caymiska ah, ETR la diiday <input type="checkbox"/> Adeegga bilaa caymiska ah, ETR laga dhaafey <input type="checkbox"/> Caymis leh laakiin loogu diiday u-baahnaan la'aan caafimaad <input type="checkbox"/> Caymis leh, laakiin nooca gaarka aan wax laga bixin <input type="checkbox"/> Amar, qoran, ama soo diray xirfadle daryeel caafimaad shatiile ah oo aan diiwaangashaneen		ETR la codsadey ama la diiday	Diidmada ETR (Ku lifaaq Ogeysiiska HCA)
			<input type="checkbox"/> Adeegga bilaa caymiska ah, ETR la diiday <input type="checkbox"/> Adeegga bilaa caymiska ah ee ETR laga dhaafay <input type="checkbox"/> Daawada aan liiska ku jirin, ee NFJ laga dhaafay <input type="checkbox"/> Caymis leh laakiin loogu diiday u-baahnaan la'aan caafimaad <input type="checkbox"/> Caymis leh, laakiin nooca gaarka aan wax laga bixin <input type="checkbox"/> Amar, qoran, ama soo diray xirfadle daryeel caafimaad shatiile ah oo aan diiwaangashaneen		ETR la codsadey ama la diiday	Diidmada ETR (Ku lifaaq Ogeysiiska HCA)
			<input type="checkbox"/> Adeegga bilaa caymiska ah, ETR la diiday <input type="checkbox"/> Adeegga bilaa caymiska ah ee ETR laga dhaafay <input type="checkbox"/> Daawada aan liiska ku jirin, ee NFJ laga dhaafay <input type="checkbox"/> Caymis leh laakiin loogu diiday u-baahnaan la'aan caafimaad <input type="checkbox"/> Caymis leh, laakiin nooca gaarka aan wax laga bixin <input type="checkbox"/> Amar, qoran, ama soo diray xirfadle daryeel caafimaad shatiile ah oo aan diiwaangashaneen		ETR la codsadey ama la diiday	Diidmada ETR (Ku lifaaq Ogeysiiska HCA)
<ul style="list-style-type: none"> Anigu waan fahansanahay in HCA ama MCO qandaraas la qaataan HCA ayna bixin doonin adeegga(yada) gaarka ah ee loo codsanayo midkood sababaha soo socda, sida jadwalka korka lagu tilmaamay: 1) Adeegga(yadu) ma hoos yimaadaan caymis HCA ; 2) adeegga(yada) ayaa loogu diiday iyada oo aan caafimaad ahaan anigu aanan ugu baahnayn, ama 3) adeegga(yadu) wey hoos yimaaddiin caymiska laakiin ma aha nooca aan anigu weydiistay. Anigu waxaan fahansanahay inaan karti u leeyahay, laakiin laga yaabaa inaan doorto inaan: 1) weydiisan qaab-socod ka duwanaansho (ETR) kadib markay HCA ama MCO qandaraas la qaatay HCA diiddo weydiisi adeeg aan caymis hoos iman; ama 2) weydiisan dhageysi ama rafcaan HCA ama MCO qandaraas la qaatay HCA diiddo weydiisi adeeg. Aniga si buuxda ayuu bixiyahani iigu wargaliyey dhammaan daaweynta caafimaad ahaan habboon ee la heli karo, oo ay ku jiraan adeegyada laga yaabaa ay bixin doonto HCA ama MCO qandaraas la qaatay HCA, oo waxaan wali dooran doonaa adeegga(yada) gaarka ah ee korka ku yaal. Anigu waxaan fahansanahay in HCA ayna daboolin adeegyada la amro, la qoro, ama ku timaad natiijo ahaan u sso diritaan bixiye daryeel caafimaad aan qandaraas la lahayn HCA sida lagu sifeeyay Cutubka Chapter 182-502 WAC. Anigu waxaan oggolahay inaan si toos ah ugu bixiyo adeegga(yada) gaarka ee korka ku qoran. Anigu waxaan fahansanahay inay ujeeddada foomkan tahay sidii aniga ay iigu oggolaan lahayd inaan bixiyo iyo inaan helo adeegga(yada) aynaama MCO qandaraas la qaatay lacagtooda bixinayn. Bixiyahan ayaa iiga jawaabay dhammaan su'aalhaygii oo waan ku qancay oo wuxuu isiiyey nuqul buuxa oo foomkan ah. Waxaan fahansanahay inaan uga wici karo taleefankan 1-800-562-3022 si aan u helo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquudeyda adeegyada ama daryeelka la maareeyo ee ujrada la iska qaado ee hoos yimaad. 						
WAXAAN QIRANAYAA: Inaan anigu fahansanahay oo aan oggolahay waxa ku jira foomkan, kana midka yihiin qodobbada korka ee dhibcaha waaweyn leh.			Saxiixa Macmiilka ama Saxiixa Waiilka Macmiilka	Taariikh		
WAXAAN QIRANAYAA: Inaan gutay mas'uuliyaddii iyo shuruudihii la rabay sida lagu meel dhigay xeerka WAC 182-502-0160.			Saxiixa Bixiyaha Adeegga(yada)	Taariikh		
WAXAAN QIRANAYAA: Anigu waxaan si sax uga af-celiyey foomkan sida ugu wanaagsan ee kartideyda ah macmiilka korka saxeeaya.			Saxiixa iyo Magaca Af-celiyaha oo daabacan	Taariikh		